


Kiisaska jadeecada ayaa kusoo kordhaya koonfurta Londhon

Ka ilaali ilmahaaga
jadeecada hadda iyo
mustaqbalkaba




Waxbadan ka ogow

www.nhs.uk/measles

Jadeecadu si fudud ayeey u faaftaa. Talaalka MMR (jadeecada, qanjo xanuun iyo jadeeco-jarmal) ayaa siiyo difaaca ugu fiican.

Astaamaha jadeecada

Jadeecadu badanka waxay ku bilaabantaa astaamamo sida durayga oo ay lasocdaan finan. Dadka qaar ayaa sidoo kale ku yeesha dhibco yaryar afka. Waxay marmarka qaar keeni kartaa caqabado daran sida indho la'aan, oof, qoor-gooye, fal-celinta caabuq - oo sababaya khatar weyn oo nololeed.



Sida finanka jadeecadu u ekaan karaan

Waxbadan ka ogow astaamaha iyo waxa aad sameyn kartid haddii aad u maleysid in adiga ama ilmahaagu qabo jadeeco: www.nhs.uk/measles

Goorma ayaan talaalaa ilmahayga?

Talaalka MMR ayaa ka qeyb ah barnaamijka talaalida carruurta ee NHS joogtada ah - iyadoo irbada koobaad lagu bixiyo hal sano irbada labaadna 18 bilood.

Labada irbadood ee talaalka MMR ayaa loo baahanyahay si loo helo difaac dhammeystiran. Marnaba wakhti kama dhicin in la qaato irbadaha la seegay.

Miyuu talaalka MMR badqabaa?

Talaalka MMR waa badqabaa waxaana la isticmaalaayey ilaa horaantii 1980 maadkii.

Ma jiro xidhiidh ka dhaxeeya talaalka MMR iyo ootiisamka. Daraasado badan ayaa muujiyey midan.

Talaalka MMR ma leeyahay wax saameyn aan fiicnayn ah?

Si lamid ah dhammaan daawooyinka kale, talaalka MMR wuxuu sababi karaa saameyn aan fiicnayn. Inta badan saameynta aan fiicnayn waa mid dhexdhexaad ah, sida dareemida xanuun gacantii irbada lagu muday ama in ilmahaagu dareemo xoogaa caajis ah oo ay lasocoto xumad muddo maalmo kooban ah.

Cadeyntu waxay muujinaysaa in talaalidu ay aad uga badqabto talaalid la'aanta.

Miyuu talaalka MMR leeyahay wax jelatiin ah (oo laga helo doofaarka)?

Ingiriiska, waxaynu ku haynaa labo talaal oo MMR ah oo aad u fiican. Mid kamida wuxuu leeyahay jelatiinta doofaarka halka ka kale aanu lahayn. Haddii aad jeceshahay talaalka aan jelatiin ka lahayn, fadlan u sheeg GP-gaaga markaad sameynaysid ballanta.

Halkee ayaan uga heli karaa talaal naftayda ama ilmahayga?

La xidhiidh GP-gaaga si aad u sameysid ballan. Sidoo kale waxaanu shaybaadh qabanaynaa:

